



BROGRAAMKA GURIGA DHEERAADKA

Maxuu yahay Brograamka ADU

Brograamka **ADU** wuxuu milkiileyaasha u fududeyaa in ay dhistaan qeyb madax banaan oo yar, gurigooda dhexdiisa, taasoo boos dheeraad ah siin karta bixiyeyaasha daryeelka, xubnaha qoyska, ama kiresteyaasha.

TUSAALOYIN



Qeybta Horay u Jirtay - Baddal qeybta madax banaan ee dheeraadka ah kana dhig qeyb la kireeyo



Qeybi Qolka - Waxaad dabaqa kowaad u qeybisaa labo qol oo "studio" ah



Baddalaadda Dabaqa Dhulka Hoose - Baddal dhulka hoose kana dhig qeyb la geli karo



Baddalaadda Saqaafka - Baddal saqaafka kana dhig qeyb dheeraad ah

Sidee ayaan ku ogaan doonaa haddii aan xaq u leeyahay?

Haddii aad tahay milkiilaha guri ka kooban hal qoys, labo qoys, ama saddax qoys oo ku yaal Boston, adigana aad daggan tahay hantida, waxaad xaq u leedahay Brograamka ADU.

Sidee ayaan ku ogaadaa ama ku bilaabaa?

Booqo www.boston.gov/adu-toolkit si aad in badan uga ogatid tafaasiisha, sida loo dalbado, fursadaha maal gelinta, fikradaha handasada iyo in kale oo badan